Siyaasadda JKA- Xakamaynta Ardayda

Adeegsigga

Siyaasaddan JKA waxaa loo adeegsan karaa dhammaan Shaqaalaha Dugsiyada Dadweynaha Denver.Isticmaalka xooga jir ahaaneed iyo waxqabadka shaqaalaha waxaa xukuma siyaasaddan.

Hirgelinta Xakamaynta

Siyaasaddan waa in la hirgeliyaa ayadoo la isticmaalayo awood go'aansasho xirfadeed oo wanaagsan, ayadoo la tixgalinayo badbaadada, nolol-wanaagga iyo sharafta xubnaha beesha dugsiga.

Qeexitaanka:

Xakamaynta waxaa loogu qeexaa sharciga gobolka iyo siyaasaddan sida hab ama aalad loo isticmaalayo in si khasab ah lagu xaddido xorriyadda ama shaqdhaqaaqa shaqsi oo ay ka mid yihiin balse aanan ku xaddidnayn xooga jir ahaaneed, aalado mashiin ah, xakamayn jir ahaaneed iyo gooni u saarid.

Hab kasta ama aalad kasta ee loo isticmaalo in si khasab ah loogu xaddido dhaqdhaqaaqa iyo xorriyadda ardayga, oo ay ka mid yihiin xoogga jir ahaaneed, xakamaynta mashiinka la adeegsado, xakamayn jir ahaaneed, iyo gooni u saarid, waa in ay u hoggaansanaadaan sharciga gobolka ee khuseeya ka dhowritaanka shaqsiyaadka xakamaynta. Isticmaal kasta ee waxqabadka jir ahaaneed ee ka badan shan daqiiqadood waa in si adag u addeecsanaado dhammaan sharciga gobolka, oo ay ka mid yihiin dhawritaanka shaqsiyaadka ee sharciga xakamaynta, iyo siyaasaddan. Kormeeraha guud iyo Guddiga Waxbarashada waa in ay sameeyaan habraacyo iyo barnaamij tababar ee loogu talagalay isticmaalka xakamayn raacsan siyaasaddan iyo sharciga gobolka.

Xakamaynta kama mid aha:

1. Isticmaalka aaladaha difaaca ama la qabsashada ee loogu talagalay siinta taageero jir ahaaneed, ka hortagidda dhaawac ama habraacyada caafimaadka ee nolosha lagu badbaadiyo ama ikhtiyaariga ah;

2. Haynta ardayga in ka yar shan daqiiqadood ee loogu talagalay difaacidda ardayga ama shaqsiyaad kale;

3. Isticmaalidda gooni u saaridda. Gooni u saaridda waa ku meelaynta ardayga kaligiisa qol ama goob cayiman ee qol ah ayadoo ujeeddadu tahay in ardayga loo oggolaado in uu ka fakaro dabeecadda aan habboonayn kahor inta uusan dib ugu soo biirin fasal ama waxqabyada kale ee dugsiga la xiriira.

Aasaasyada loogu talagalay isticmaalidda Xakamaynta:

Shaqsiyaad u shaqeeya degmada kuwaasi oo shahaado u haysta habka xakamaynta jir ahaaneed ee la aqoonsan yahay, waxaa laga yaabaa, in ay gudaha xadka shaqadiisa/shaqadeeda, ay ku isticmaalaan xakamayn jir ahaaneed ee suurtagal ah iyo/ama gooni u saaris ah sida hab looga ilaalinayo ardayga ama kuwa kale in laga xakameeyo halista waxyeellaynta jirka ah ee dhakhsa u dhici karta , suurtagal ah, ama dhabta ah.

Xakamaynta waxaa loo isticmaali karaa kaliya xaaladaha degdega ah marka badiilada kale ee xannabeynta yar ay guuldaraystaan ama xubinka shaqaalaha uu go'aamiyo in badiilada noocaas ah aysan ku habboonayn ama aysan waxtar u lahayn daruufaha jira.

Xaaladda degdega ah waa halista waxyeellaynta jirka ee dhakhsada u dhici karta, suurtagalka ah, dhab ah oo qofka isu geysan kara ama uu u geysan kara kuwa kale meesha ay jirto awoodda hadda ee lagu saameyn karo waxyeellada noocaas ah.

Ujeeddada isticmaalka xakamaynta waa in ay noqoto ka hortaga sii socoshada ama dib u soo cusboonashada xaaladda degdega ah. Xakamaynta waa in kaliya la isticmaalaa muddada wakhtiga ay daruuriga tahay in laga guulgaaro ujeeddadeeda. Waa in aysan jirin dhacdo xoog jir ahaaneed la isticmaalayo oo ka baxsan kan daruuriga u ah in lagu xadeeyo xoriyadda dhaqdhaqaaqa ardayga.

Waajibaadyada la xiriira Isticmaalka Xakamaynta:

Marka xakamaynta loo arko in ay daruuri tahay waajibaadyadan soosocda ayaa waxaa adeegsanaya shaqsiga (shaqsiyaadka) shahaadada u haysta waxqabadyada xakamaynta ku habboon:

1. Shaqsiga mas'uulka ka ah maamulidda xakamaynta waa in uu ilaaliyaa arday kasta ee loo haayo xakamayn ugu yaraan shan-iyo-toban daqiiqadood kasta si loo hubsado in ardayga sida saxda ah loo meeleeyay, wareegga dhiigga ardayga in aan la xannibin, hawo-mareenka ardayga in aanan la xirin iyo in la kulmiyay baahiyada jir ahaaneed kale ee ardayga.

Shaqsiga ku jira xakamaynta jir ahaaneed waa in laga siidaayo xakamaynta jir ahaaneed shan-iyo-toban (15) daqiiqadood gudahooda, marka laga reebo in loo baajiyay sababo badbaado awgood.

2. Waa in xakamayn jir ahaaneed kasta aysan saarin cadaadis badan dhabarka ardayga ama uusan joojinin ama xayirin awoodda ay ku neefsanayaan. Xubinka shaqaalaha waa in uu eego si uu u hubsado in neefsashada ardayga aysan xal dhexe galin.

3. Waxqabadka caafimaad (xakamaynta daawayn) waa in kaliya lagu isticmaalo amarka takhtar.

4. Mudddooyinka caawimada ee gooni u saaridda waa in loo oggolaadaa xarumaha musqusha ee suurtagalka ah.

5. Tababarka Shaqaalaha: Kaliya shaqsiyaadka loo tababaray isticmaalka habboon ee xakamaynta ayaa hirgelin kara. Shaqaalaha waa in uu helo tababarka sannadlaha adeegga gudahiisa ah ee ku saabsan isticmaalka habboon ee xakamaynta. Tababarka waa in ay ka mid noqoto shuruudda ah in shaqaalaha uu sharxo meesha ay suurtagal tahay, isticmaalka xakamaynta shaqsiga la xakamaynayo iyo qoyska shaqsiga haddii ay ku habboon tahay. Tababarka waa in sidoo kale ka mid noqdo qoritaanka xogta habboon iyo habraacyada ogeysiiska.

Qoritaanka xogta iyo dib-u eegista:

Haddii xakamayn jir aheeneed la isticmaalay:

1. Warbixin qoran waa in loo gudbiyo hal (1) maalin dugsi gudaheeda maamulka dugsiga.

2. Maamulaha dugsiga ama qofka loo magacaabay waa in hadal ahaan ugu ogeysiiyaan waalidiinta sida ugu dhakhsiyaha badan balse aan ka dambayn dhammaadka maalinta dugsiga ee xakamaynta la isticmaalay.

3. Warbixin qoran waa in boostada loo dhigaa, Emayl loogu diraa, ama fakis loogu diraa waalidka (waalidiinta) sodan-iyo-lix saacadood gudahooda ee ku xiga isticmaalka xakamaynta iyo in nuqul lagu meeleeyo faylka la isku-ururiyay ee ardayga.

4. Marka uu codsado waalidka ama mas'uulka, hanaan dib-u-eegis ayaa lagu sameynayaa dhacdada xakamaynta la isticmaalay.

* Saraakiisha amniga Dugsiga Dadweynaha Denver waxaa laga reebay siyaasaddan ayadoo si gooni ah loogu xukumo sharciga gobolka ee la xiriira saraakiisha amniga. La Ansixiya: 21 Abriil, 1966

La muraajaceeyay 1 Sibteembar 1, 1970
La muraajaceeyay si loo waafajiyo habdhaqanka: Abriil 1994
La muraajaceeyay 19 Oktoobar, 2000
La muraajaceeyay 15 Sibteembar, 2005

TIXRAACYADA SHARCIGA.: C.R.S. 18-1-703
C.R.S. 18-6-401 (1)
C.R.S. 19-3-103 (1)
C.R.S. 22-32-110 (2), (4)(b)(I)
C.R.S. 26-20-102(5)
* C.R.S. 24-7-103